



Double Outlet Right Ventricle (DORV)

(Cillad Lagu Dhasho oo ah Wadnaha iyo Sambabka ama DORV)



Wadne caadi



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

Cillad Lagu Dhasho oo ah Wadnaha iyo Sambabka ama DORV Double-Outlet Right Ventricle (DORV)

Markuu wadnuhu caadi yahay, pulmonary artery (halbowlaha sambabbada ama PA) wuxuu ka soo baxaa qalbaca midig oo wuxuu sambabbada u soo qaadaa dhiig u baahan ogsijiin (buluug) si ay ogsijiin u soo raacdo. Dhiigga ogsajiinta leh wuxuu dib ugu soo noqdaa dhinaca bidix ee wadnaha oo waxa uu sii aadaa xubnaha jirka iyo halbowlaha weyn, kaas oo ka soo baxa left ventricle (qalbaca bidix ama LV).

Double-outlet right ventricle (Cilladda Lagu dhasho ee wadnaha iyo sambabka ama DORV), PA iyo halbowlaha weyn ayaa ka soo baxa qalbaca midig. Sida keliya ee uu dhiiggu uga baxo LV waa iyada oo loo maro ventricular septal defect (qalbaca weyn ee cilladda leh ama VSD), duleel u dhaxeeya qalbacyada bidix iyo midig. Caadi ahaan, halbowlaha waaweyni dhinaca ayey isku hayaan oo kanaal ayaa kala qeybiya. PA inta badan waa dhanka bidix ee halbowlaha weyn. Wadnaha qaabdhismeedkiisu yahay caadiga, tuubbada sambabada waxay ka sarreysaa halbowlaha weyn iyo daboolkiisa qeybo ku dhow muruq kale oo xalleefsan. Xaalladda DORV, daboolka sambabada iyo halbowlaha weyn ayaa isku heer ah oo ma jiraan wax u dhexeeya halbowlaha weyn iyo muruqa kale ee xalleefsan. Waxaa jira dhowr nooc oo hoose oo ah DORV, oo waxay ku xiran tahay booskooda VSD ama in aysan jirin dhuubasho ama right ventricular outflow tract obstruction (xayiraad ah qulqulka dhiigga ee dhuunta qalbaca midig ama RVOTO).

Noocyada:

- Halbowlaha Hoose ee VSD: VSD waa dhinaca midig ee darbiga, meel ku dhow halbowlaha. Waa nooca ugu badan ee DORV, oo kiisaska la arko waa 50 ilaa 70%. RVOTO waxay sidoo kale ku dhacdaa 50% ka mid ah ilmaha.
- Dhinaca Hoose ee VSD (Taussig-Bing): VSD waxa uu ku yaalaa dhanka bidix ee darbiga, oo waxa uu ku dhowyahay daboolka sambabka. Waxa ay ku dhacdaa 10 ilaa 30% ilmaha qaba DORV.
- VSD Laba-Laba Noqota: Waa kiisas dhaca in ka yar 5%. VSD waxay si dhow ula xiriirtaa labada dabool ee halbowlaha iyo sambabka ee ka sarreeya murqaha gudaha iyo kan sambabka.
- VSD Aan la Hubin: kiisas ah 10%, VSD aad ayey uga fog tahay daboolada halbowlaha weyn iyo sambabka. Noocan waxaa inta badan lala xiriiyaa isku mid ahaanshaha qeybta kore ee wadnaha (oo waa wax qaab-dhismeed ahaan isku mid ah).

Cilladsheegista/Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:

Markay jirto dhuubasho ah sambabbada ama RVOTO:

- Jirkoo isbeddela iyo koritaanka oo xumaada ayaa caadi ah.
- Guux heerar ah II ilaa III ayaa laga maqlayaa dhanka bidix ee xuduudka bidix ee xabadka.
- Dhiigga sare ayaa soo gaari kara xadka dhexe ee xuduudda bidix.
- Raajada xabadka waxay muujinaysaa hoos u dhaca calaamadaha xididdada sambabada oo cabbir ahaan wadnuhu waa caadi.
- EKG: Badanaa, xannibaad ah AV ayaa jirta. Qalbacyada kore iyo kan midigta ayaa unug ahaan ka weynaada cabbirkoodii. Xannibaad ah waaxda midig ayaa dhici karta.
- Uultarasawanka wadnaha: Cilladsheegid.

Markaysan jirin dhuubasho ah sambabbada ama RVOTO:

- Ma jiro isbeddel ama mid khafiif ah ayaa jiraya.
- Qulqulka dhiigga sambabbada ayaa kordha, oo wuxuu keenayaa garaacis degdeg ah (neefsasho boobsiis ah), koritaan xumo iyo cunto-xumo.
- Guuxa guud oo ah S2 cod dheer iyo firfircooni badan oo ah wadnaha agtiisa ayaa jirta.
- Raajada xabadka waxay muujinaysaa koror ah calaamadaha xididdada sambabada, wadne-barar (wadnaha oo weynaada), iyo qeyb ahaan halbowlaha sambabka.
- EKG waxay caadi ahaan muujisaa midig ama labada dhinac iyo bidixda oo qalbacyada wadnuhu unug ahaan u weynaadaan. Xannibaadda AV ee heerka koowaad ayaa marmar dhaca.
- Uultarasawanka wadnaha: Cilladsheegid.

Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:

- Daawo biyaha ka saarta ayaa ilmaha loo qoraa si loogu maareeyo calaamadaha la xiriira qulqulka dhiigga sambabka iyo congestive heart failure (wadnaha oo dhiigga soo saari waaya ama CHF).

Cillad Lagu Dhasho oo ah Wadnaha iyo Sambabka ama DORV

Double-Outlet Right Ventricle (DORV)

- Qalliin ah duleelinta meel u dhow wadnaha (weyneenta duleelka/xiriirka qalbacyada wadnaha) ayaa loo baahan karaa qalliinka ka hor si culeyska looga yareeyo qalbaca bidixe iyadoo la hagaajinayo dhiigga isku-dhafan ee ah buluugga iyo guduudka. Hawshan waxaa lagu sameeyaasheybaarka tuubba-gelinta wadnaha.
- Habka qalliinka iyo wakhtiga waxaa lagu go'aaminayaa meesha uu joogo VSD iyo in uu PS jiro iyo in kale. Dhakhtarka daaweeya wadnaha iyo dhakhtarka qala wadnaha ayaa go'aamin doona nooca qalliinka ah ee ku habboon ilmaha. Fadlan eeg Hagaajinta Cilladda Qalbacyada Wadnaha, Qalliinka Kala-beddelka Qalbacyada Wadnaha ee Kore, Hagaajinta Nikaidoh, Hagaajinta Damus-Kaye-Stansel, Gaarsiinta Halbowlaha Qalbaca Midige ilaa Halbowlaha Kanaalka Sambabka, qalliinka kordhinaya sambabka dhiigga ee Blalock-Taussig Shunt, qalliinka soo leexinaya dhiigga kore ee Bidirectional Glenn Shunt, or Qalliinka Fududeynta Fontan Wixii faahfaahin gaar ah nooc kasta oo ah hagaajinta qalliinka iyo soo-kabashada qalliinka ka dib.
- La-socosho ah daaweynta wadnaha oo joogto ah ayaa khasab noqoneysa.
- Antibiyootigga loo qaato bakteeriyada ee qalliinka ilkaha ka hor ayaa ilmaha lagula talinayaa. Carruurta qaarkood, noloshooda oo dhan ayey sii qaadan doonaan. Dhakhtarka wadnaha weydii wixii talooyin gaar ah ee u fiican ilmaha.

Natijjooyinka Mustaqbalka-Fog:

- Badanaa ilmaha laga helo VSD ee halbowlaha weyn ee aan qabin dhuubashada sambabka nolol ahaan rajadoodu waa caadi.
- Natijjooyinka mustaqbalka-fog waxay ku kala duwan yihiin noocyada kale ee DORV oo waxay ku xiran habka qalliinka ilmaha.
- Guux ah dhinaca hoose ayaa soo bixi kara qalliinka ka dib ama goor dambe oo ah nolosha ilmaha oo waa in la daaweeyo.